UNSOM

UNITED NATIONS
HUMAN RIGHTS
OFFICE OF THE HIGH COMMISSIONER



# Ilaalinta Dadka Rayidka

## Dhisidda Aasaaska Nabadda, Amniga iyo Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya

**Diseembar 2017**

## Warbixinta oo kooban

Warbixintan waxay diiradda saareysaa xadgudubyada sharciga caalamiga ee baniaadanimada xilliyada dagaallada iyo xuquuqul insaanka ee lagu geysto colaadda hubeysan ee muddada dheer ka jirta Soomaaliya. Natiijooyinka iyo falanqeynta ku jirta warbixinta waa isku dayga kowaad ee ay UNSOM ku tirinayso dhimasha iyo dhaawaca rayidka ah (dadka rayidka ah ee lagu dilo ama lagu dhaawaco colaadda hubeysan) ayna ku qiimeynayso khasaaraha ay u geysatay dadka rayidka ah muddadii u dhexeysay 1dii Janaayo 2016 iyo 14kii Oktoobar 2017. Intii muddadan lagu jiray, weerarrada ay geysteen dhinacyada dowladda iyo kuwa aan dowladda ahayn ayaa khasaare aad u badan oo isugu jira dhimasho iyo dhaawac u geystay dadka rayidka ah, sababayna burburka kaabayaal ay dowladdu leedahay iyo kuwo gaar loo leeyahay, isla markaana laayay xoolo nool, carqaladeeyayna in bulshada baahan ay helaan gargaarka baniaadanimo. Warbixinta waxaa loola danleeyahay inay noqoto xog billow ah oo falanqeyn dheeraad ah oo ku saabsan saameynta ay colaaddu ku leedahay dadka rayidka ah lagu diiwaangelin karo waxaana ku jira talooyin loo soo jeediyay si loo yareeyo loogana hortago khasaaraha dadka rayidka ah, kuwaasoo la kormeeri karo si loo hirgeliyo.

Laga soo billaabo 1dii Janaayo 2016 ilaa iyo 14kii Oktoobar 2017, UNSOM waxay diiwaangelisay tiro wadarteedu gaareyso 4,585 oo khasaare loo geystay dad rayid ah (2,078 oo la dilay iyo 2,507 la dhaawacay), boqolkiiba 60 oo ka mid ah waxaa loo aaneeyay Al-Shabaab, boqolkiiba 13. waxaa loo aaneeyay maleeshiyaadka, boqolkiiba 11waxaa loo aaneeyay dhinacyada Dowladda, boqolkiiba afar waxaa loo aaneeyay Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM), boqolkiiba 12.na waxaa loo aaneeyay dhinacyo kale oo aan la qeexin ama aan la aqoonsanin. Intaa waxaa dheer, in 729 dad rayid ah ay Al-Shabaab afduubeen, oo 403 ka mid ah la sheegay in in la soo daayay. Sidoo kale, Al-Shabaab waxay mas'uul ka ahaayeen 86 oo dilal qorsheysan ah oo dad rayid ah lala beegsaday, waxayna dil ku fuliyeen 46 qof inta lagu jiray muddada warbixinta.

Sida laga soo xigtay Hay'adda Qaramada Midoobay ee Adeegga Hawlaha Miinada (UNMAS), dadka rayidka ah waxay noqonayaan boqolkiiba 54 ka mid ah khasaaraha oo wadarta tiradeedu gaarayso 2298 (748 dhimasho iyo 1550 dhaawac) oo ay sababaan qaraxyada loo adeegsado walxaha qarxa ee macmalka ah (IEDs). Ka hor weerarkii halaagga ahaa ee ka dhacay magaalada Muqdisho 14kii bishiii Oktoobar 2017 ee lagu dilay 512 dad rayid ah, laguna dhaawacay 316, tirada ugu badan ee ah khasaare loo geystay dad rayid ah waxay dhacday bilihii Juun 2016 iyo Janaayo 2017, waxayna inta badan ka dhaceen gobollada Banaadir, Baay iyo Shabeellaha Hoose), waxayna kala dhaceen bishii Ramadaan iyo muddadii ay socotay doorashada.

Dhinacyada Dowladda iyo kuwa aan dowladda ahayn ayaa geystay dilal sharciga ka baxsan, tacaddiyo galmo iyo kuwo jinsiga ku saleysan, qabqabasho iyo xarig aan loo meeldayin, afduub, iyo jirdil. Tusaale ahaan, qabqabashada iyo xarigga ay Hay'ada Sirdoonka iyo Nabadsugida (NISA) sameeyaan ayaa si joogta ah ugu xadgudba sharciga caalamiga ee xuquuqul insaanka, waxaana welwel gaar ah leh in aalaaba la soo qabto/xiro saxafiyiinta iyo dadka lagu tuhmo inay Al-Shabaab ka tirsanyihiin iyagoon wax eedeyn ah lagu soo oogin. Carruurta Soomaaliyeed ayaa si xad dhaaf ah colaaddu u saameysaa, waxaana ku dhaca xadgudubyo culculus xilliyada hawlgallada ciidan, kuwaasoo ay ka midyihiin dil, dhaawac jirka ah, iyo soo qabqabasho iyo xarig ay u geystaan ciidamada amniga Soomaaliya xilliyada lagu jiro hawlgallada ciidan ama amni. Colaadda dabadheeraatay waxaa sidoo kale ka dhashay tacaddiyo baahsan oo xagga galmada ah iyo kuwo jinsiga ku saleysan ee ka dhanka ah haweenka, raga, wiilasha iyo gabdhaha, iyagoo si gaar ah u saameeya haweenka iyo gabdhaha.

Tiro badan oo ka mid ah khasaaraha gaaray dadka rayidha ah ee la diiwaan-geliyay ayaa waxaa loo aaneynayaa maleeshiyo beeleedyada ka qeybqaata colaadaha hubeysan ee aan caalamiga ahayn ee ka dhaca meelaha aanay ku sugneyn ciidamada amniga ee heer federal iyo heer maamul goboleed. Waxyaabaha ugu waaweyn ee horseeda colaad beeleedka ayaa ah khilaaf ka dhasa is-qabqabsi

dhuleed iyo mid kheyraad, waxaana sii huriya aargoosi soo noqnoqda. Abaaraha ayaa sii huriyay colaadaha u dhexeeya beelaha sababo la xiriira tartan loo galo kheyraadka. Colaadahan waxaa ka dhex faa'iideysta xoogagga kasoo horjeeda dowladda si ay u sii kordhiyaan xasilooni darrida deegaannada, una yareeyaan rajada laga qano nabad waarta ayna u wiiqaan badbaadinta dadka rayidka ah.

Sii socoshada weerarada lala beegsanayo dadka rayidka ah iyo weerarada aan loo meel dayin ee ay geysanayaan xoogagga aan Dowliga aheyn – iyagoo si gaar ah u adeegsanaya Walxaha Qarxa ee Macmalka ah iyo weerarada is-miidaaminta ah ee ay ka geystaan goobaha ay ku badanyihiin dadka rayidka ah – ayaa ah falal mamnuuc ku ah sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaalka iyadoo inta badan noqda dembiyo dagaal. Waxaa lagama maarmaan ah in kuwa geysta falalkaas la aqoonsado oo lala xisaabtamo.

Iyadoo khasaarooyinka ugu badan ee soo gaaray dadka rayidka ah intii lagu guda jiray muddada warbixintan, ay geysteen Al-Shabaab iyo xoogag kale oo aan dowliga aheyn, ayaa tiro yar oo kamid ah khasaarahaas waxaa loo aaneeyay ciidamada amniga ee Dowladda iyo kuwa AMISOM. Kuwan ayaa ah walaaca ugu weyn maadaama ay wiiqayaan kalsoonida dadka Soomaaliyeed ay ku qabaan Dowladda iyo beesha caalamka, taas oo natiijadeedu noqonayso inay sii ballaarato baaxadda ay ku hawlgalaan xoogagga kasoo horjeeda dowladda.

Qaar kamid ah tallaabooyin ay qaadeen Dowladda Federaalka ah iyo Baarlamaanka, sida dhismaha guddiyo baaritaan oo marka ay wax dhacaan baaritaanno ku sameeya xadgudubyada waaweyn ayaa waxay ka marqaati kacayaan inay jiraan dadaallo wax looga qabanayo xadgudubyada inkasoo aanay kasoo bixin wax natiijooyin ah. Hirgelinta heshiiska siyaasadeed ee ku aaddan Hab-dhismeedka Amniga Qaran ee ay wada gaareen Dowladda Federaalka ah iyo Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah bishii Abriil 2017 ayaa udub dhexaad u ah xaqiijinta dib-u-habayn waarta oo lagu sameeyo waaxda amniga. Waxay siineysaa fursad lagu xaqiijinayo in hay'ado amni oo ay hogaaminayaan dadka Soomaaliyeed ay yihiin kuwo lagala xisaabtamo isla markaasina leh awood ay ku sugaan amniga kuna ilaaliyaan muwaadiniinta, si waafaqsan sahrciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaalka. Dhismaha Gudduga Qaran ee Madaxabanaan ee Xuquuqul Insaanka oo awood u leh in uu baaro xadgudubyada ka dhanka ah xuquuql insaanka uuna la xisaabtamo kuwa dhibka geysta, gaar ahaan dembiyada ay geystaan ciidamada amniga, guddigaas oo hawshiisu ay socoto ayaa muhiim u ah arrimahan.

Horumarinta xuquuqul insaanka iyo badbaadinta dadka rayidka ah, oo ah kuwo aasaas u ahDowlad sharciyad leh, ayaa ka ah Soomaaliya caqabad aad u weyn sababo la xiriira xaaladda amni ee aadka u adag iyo ku dhaqanka sharciga oo liita amaba aan jirin. Si loo taageero dadaallada lagu wanaajinayo badbaadinta dadka rayidka ah iyo u hogaansanaanta waajibaadka Xuquuqul Insaanka, ayaa UNSOM waxay soo jeedinaysaa in dhamaan dhinacyada ku lugta leh colaadaha ay qaadaan tallaabooyin kasta oo suurto gal ah oo lagu ilaalinayo dadka rayidka ah marka la fulinayo hawlgallada ciidan, taas oo loo marayo in la joojiyo beegsiga ku talagalka ah ee la beegsanayo dadka rayidka ah iyo goobohooda/hantidooda, in lasoo afjaro adeegsiga Walxaha Qarxa ee Macmalka ah, iyo in la joojiyo duqeynta loo adeegsado hoobiyaha, gantaalaha iyo bambaanooyinka lagu tuuro ama lagasoo tuuro goobaha ay joogaan dadka rayidka ah.

Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo Dowald Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah waxaa lagu dhiiri-gelinayaa inay meel mariyaan siyaasad iyo tallaabooyin sharciyadeed oo lagu dhaqan geliyo sharciga kuwaas oo lagama maarmaan u ah xaqiijinta baaritaan wax ku ool ah iyo sharci hor-keenista dembiyada iyo xadgudubyada halista ah ee ka dhanka ah sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka iyo sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaalka. Dhinaca AMISOM – na fulinta qaar kamid ah tallaabooyinka lasoo jeediyay ee ku xusan qaab-samaynta Siyaasadda Qaramada midoobay ee Ka-taxaddarka Xuquuqul Insaanka (HRDDP), sida soo saarista Amarro kasoo baxa

Taliyeyaasha Ciidamada [AMISOM] oo ku aaddan ilaalinta dadka rayidka ah iyo u hogaansanaanta sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaallada, tababarrada iyo faafinta xuquuqul insaanka iyo Xeerarka Ka-qaybgalka ee Sharciga Caalamiga ah Xilliyada Dagaallada ayaa waxay muujinayaan horumar. Si kastaba ha ahaatee, waxaa AMISOM lagu dhiiri-gelinayaa inay xoojiso tallaabooyinka isla-xisaabtanka ee dhacdooyinka la xiriira dadka rayidka ah iyadoo loo marayo baaritaanno si degdegsiimo leh loo sameeyo iyo in lasoo gudbiyo natiijooyinka, waana in ay wada-shaqayn la yesshaan dhamaan Qaramada Midoobay iyo hawl-wadeennada samafalka/ gargaarka si loo xoojiyo awoodda gudashada waajibaadkeeda iyadoo si buuxda loogu hogaansamayo waajibaadka Dowladaha ka-qaybqaadanayo [hawlaha nabadaynta] ka saaran sharciga caalamiga ah ee xilliyada dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka.

## Habka Cilmi Baarista

Qaybta Ilaalinta Xuquuqul Insaanka UNSOM (HRPG) waxay diiwaangelisaa khasaaraha soo gaara rayidka ah taasoo ku salaysan habka ugu wanaagsan ee caalamiga ah, habka kormeerka xuquuqda aadanaha, habraaca habka Kormeerka iyo Warbixinta ee Qaramada Midoobay (MRM)), iyo buug-hawleedka Qaramada Midoobay ee ku saabsan xadgudubyada waaweyn ee carruurta ku jira coladaaha hubaysan. Warbixinta waxay ula jeedaa khasaaraha soo gaara dadka rayidka ah jiritaanka sababo macquul ah oo loo rumeysanayoin dhibanayaashu ay ahaayeen rayid, loona diley ama la dhaawacay si toos ah oo la xariira hawlaha dagaal iyo falalka, go'aamada iyo / ama ujeeddooyinka keenaya inay si dhow ula xiriiraan colaadaha.

Ujeeddooyinka warbixintan, UNSOM waxay raacaysaa habka ay ogol yihiin sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo sharciyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, ama habka "ku saleysan xuquuqda". Tanina waxay waafaqsan tahay tahay waajibaadkeeda ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ka mid tahay ilaalinta, baarista iyo ka warbixinta badbaadinta rayidka iyo ka caawinta ka hortagga kufsiga iyagoo u doodaya, iyo taageeridda mas'uuliyiinta Soomaaliya si ay u gutaan waajibaadkooda xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah. [1]

UNSOM waxay kormeertaa eedaymaha ka dhanka ah dhammaan dhinacyada isku haya colaadaha iyo warbixinnada ku saabsan xadgudubyada iyadoon loo eegin ciddii geysatay. Waxay sameysaa wareysiyo, booqasho goobeed, iyo habab kale oo lagu ururiyo macluumaadka, iyadoo la raacayo sharciyo adag si loo ilaaliyo qarsoodiga ilaha xogta loogana fogaado in howsha dhibaato ka timaado, iyo sugida sumcada Qaramada Midoobay. Inkastoo warbixintan ay isku dayayso inay hesho tirada

[1] UNSOM waxay u heysataa erayga khasaaraha dadka rayidka ah marka sharciga caalamiga ah ee bani'aadamnimada uu khuseeyo halka dhibanaha loola jeedo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
Diiwaangelinta shakhsi ahaan sida dhimasho ma aha had iyo jeer go›aan ka gaarista xadgudubka sharciga caalamiga ah (inkastoo tiro badan oo khasaare ah ay muujin karaan xadgudubyo ayna muujinayaan fikradda ‹qaababka waxyeellada›). Diiwaangelinta dhibanayaasha ee UNSOM ayaa lagu qaadaa xaaladaha isku dhaca marka ay jiraan dhacdooyin badan oo dhaca dhacdooyinka, goobaha nabadgelyo-xumadu aanay u oggolaan helitaanka. Taas awgeed, suurtagal maaha in la aqoonsado dhibbane kasta (tusaale ahaan, markii qarax bambo lagu geesto aagga magaalooyinka), waxay go›aaminayaan xaaladdooda wakhtiga (tusaale, haddii ay adeegsanayaan ama si toos ah uga qaybqaadanayaan colaadaha), waxay u dhigantaa mas›uuliyadda khasaare kasta (tusaale ahaan, halkaas oo kooxo hubaysan oo badani ay ku sugan yihiin aagga) ayna sameeyaan go›aan ku saabsan xad-gudub kasta oo ku lug leh xaalad walba (tusaale ahaan, haddii khasaare loo geysto dadka rayidka ah iyo / ama shicibka rayidka ah ay xad-dhaaf u yihiin marka loo eego faa›iidada milatari ee la filayo).
Iyadoo lagu saleynayo habka kormeerka OHCHR, eedeeymaha ay UNSOM ka heshay AMISOM waxaa lagu wareejiyaa AMISOM iyada oo loo marayo qaabka HRDDP. Arrintan, UNSOM waxay raadineysaa macluumaad ku saabsan dhacdooyinka, tallaabooyinka loo qaaday si loo baaro iyo sida ugu muhimsan, hayso dambiilayaasha si ay u xisaabtamaan. Wadashaqeynta AMISOM ee dhacdooyinka waxaa ay ka dhacdaa iyada oo la adeegsanayo is-weydaarsi iyo qoraalo kala duwan, oo ay ka mid yihiin Kooxda Hawl-galinta ee UN-AMISOM ee HRDDP taas oo markaa go'aan ka gaara ama kula talisa AMISOM, kooxaha wada jirka ah ee AMISOM-QM ee baaritaanka iyo xisaabtanka. Iyada oo la tixgelinayo xaaladaha SEA, warbixintu waxay soo socotaa habab laba jibbaar ah oo la xidhiidha eedeymaha lala wadaago qoraal ahaan AMISOM oo tilmaamaysa dhibbanaha iyo ilaalinta markhaatiga

guud ee khasaaryinka soo gaara dadka rayidka ah ee la diiwaan geliyey muddada warbixintan, haddana waa in la xusuusnaadaa in dhammaan khasaarooyinka soo gaara dadka rayidka ahi aysan ahayn xadgudub sharciga caalamiga ee xuquuqda biniaadanka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.

sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha waxaa uu qabaa in  dhinacyada dagaalka qeybta ka ah ay mar walba kala soocaan dadka rayidka ah iyo dagaalyahannada, Alaabaha/waxyaalaha rayidka iyo ujeedooyinka milatari, waana inay qaadaan dhammaan tallaabooyinka la fulin karo si looga hortago khasaaraha rayidka, haddana dhimashada ama dhaawaca rayidka ama burburinta alabaaha rayidka ee aan ku talagalka aheyn kuwaas oo  ka dhashay  weerar leh  ujeedo milateri ah oo  sharci ah  ma noqonayaan  xad gudub sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha.. UNSOM waxay aqoonsantahay in dhimashada dadka rayidka ah iyo burburinta hantida rayidka ah inta lagu jiro colaad hubaysan, si kastaba dhibka ha weynaadee, in laga yaabo in aysan sidooda iyo keligooda noqon karin xad-gudub loo geystay sharci caalami ah, isla markaana waxay sameyn doontaa dadaal kasta oo lagu aqoonsado sida u saxan ee suura galka ah cidda mas'uul ka ah khasaae khaas oo ku dhaca rayidka. Iyadoo ay jirto xaddidaadyo la xariira caqabadaha ammaanka, meesha iyo xaalada shaqadana dhib badan tahay, sida aqoonsiyada aan caddayn ee AMISOM iyo kuwa aan ciidamada AMISOM ka tirsaneyn markay ciidamada ka socda waddanada qaar u shaqeeyaan dallado kala duwan, awood la'aanta ilaha macluumaadka in ay cad u aqoonsadaan ama kala saaraan jilayaasha, ama maqnaanshaha sheegashada mas'uuliyadda, mar walba suurtagal ma ah in UNSOM ay mas'uuliyadda cid u aaneyso.

Ilaha xogta loo isticmaalay si loo soo ururiyo macluumaadka way kala duwan yihiin waxaana ku jira dhibbanayaasha, markhaatiyada, iyo xubnaha qoyska, iyo ururrada aan dawliga ahayn (NGOs) iyo kuwa caalamiga ah. UNSOM waxay sidoo kale ururisay macluumaadka saraakiisha maxalliga ah, hoggaamiyeyaasha bulshada, booliska, millateriga, saxafiyiinta iyo hay'adaha Qaramada Midoobay. UNSOM waxay sidoo kale dib u eegtay macluumaadka dokumantiyada oo ay ku jiraan dukumiintiyada rasmiga ah, diiwaannada ay hayaan hay'adaha dowladda iyo / hay'ado kale, sawirro, muuqaaallada fiidiyowga, iyo cajalado, iyo warar laga helay ilo furan  ay ku jiraan warbaahinta, internetka, warbaahinta bulshada, iyo warbixinno ka socda ururrada aan dawliga ahayn (NGOs). Ilaha waxay ahaayeen kuwo asaasi ah (toos) ama ilo labaad (si dadban).

UNSOM waxay u baahan tahay ugu yaraan saddex ilood oo kala madax banaan si loo xaqiijiyo dhimashada dadka rayidka ah. Meel walba oo suurtagal ah, macluumaadka waxaa laga helaa ilaha koowaad oo ah dhibbanayaasha iyo / ama markhaatiyaasha, inkasta oo nabadgelyo-xumada jirta ay si weyn u xaddido gaaritaanka UNSOM. UNSOM kuma aysan darin macluumaadka aan la baarin ama la xaqiijin. Sidaa darteed, tirada dhabta ah ee khasaaraha waxay u badan tahay inay sarreeyso.  UNSOM waxay soo sameysay habab kala duwan, oo ay ka mid tahay in la dhiso awoodda ilaheeda macmuulaadka si ay ula socdaan kana soo warbixiyaan xuquuqda aadanaha. Dhacdooyinka qaarkood, xaaladda rayidnimo ee dhibbanayaasha la soo sheegey si dhameystiran looma xaqiijin. . Xogta la kala saaro ayaan weli la helin, laakiin marar dhowr ah, macluumaadka la xaqiijiyay waxaa ka mid xogta jinsiga iyo da'da.

Eedeymaha ay ku lug leeyihiin ciidama AMISOM ayaa si joogto ah laga xiriiray ama loo gudbiyay AMISOM iyagoo ay la socdaan talaabooyin lagula taliyay ama codsiyo looga codsanayo xog ku saabsan talaabooyinka ay qaadeen. Marka ay timaado dhacdooyinka la xariira duqeymaha ay diyaarada geystaan, UNSOM waxay dib-u-eegis ku sameysaa warbixinada ku saabsan isticmaalka AMISOM ee diyaaradaha dagaalka si go'aan looga gaaro in diyaaradaha helicobtarda ay duulimaad ka sameeyeen goobta dhacdada isla taariikhdaas.

UNSOM waxay bixisay [la qeybsatay] nuqulo hormarin ah oo warbixintan ah si loo hubi khaladaadka ku jira xaqiiqda, jawaabihii laga helayna waxaa lagu lifaaqay warbixintan.[2] Faalooyinka la soo bixiyay qaarkood waxaa si toos ah looga jawaabay warbixitan dhexdeeda.

## Talo soo jeedin

Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowlad Goboleedyada Federaalka iyo ciidamada caalamiga ah waa inay hormariyaan, hirgeliyaan, dhinacyada kalena la wadaagaan siyaasadaha hawlgalka iyo tallaabooyin wax ku ool ah si loo xoojiyo ixtiraamka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bini'aadanimada xilliyada colaadaha, kana fogaadaan waxyeellada dadka rayidka ah, iyada oo si dareen gaar ah la siinayo fulinta hawlgallada millatari ee magaalooyinka. Gaar ahaan,

Dhinacyada colaadda isku haya, oo ay ku jiraan dalalka AMISOM ciidamada/booliska u soo diray waa inay:

- U hoggaansamaan oo xaqiijiyaan ixtiraamka sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee bini'aadanimada xilliyada colaadaha, oo ay ku jiraan amarrada ama jiheynta, iyo inay la xisaabtamaan kuwa beegsanaya, dilaya ama dhaawacaya dadka rayidka ah;
- Qaadaan dhammaan tallaabooyinka taxadarka ee suurtagalka ah ee lagu ilaalinayo dadka rayidka, gaar ahaan haweenka iyo carruurta, lagana ilaaliyo saameynta hawlagallada ciidamada;
- Iska ilaaliyaan inay yoolalka/ujeeddooyinka ciidamada dhexdhigaan gudaha iyo meel u dhow goobaha dadka rayidka deganyihiin;
- Inay joojiyaan inay ciidamada aan caadiga ahayn, miliishiyooyinka iyo kooxaha hubaysan u adeegsadaan hawlgallada CXDS iyo AMISOM, ay kala diraan hub ka dhigisna ku sameeyaan dhammaan kooxaha iyo maleeshiyada sharci-darrada ah ee hubeysan;
- Taageero ku filan siiyaan ururinta nidaamsan iyo falanqaynta macluumaadka ku saabsan ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ka mid tahay xogta oo loo kala soocay jinsiga iyo da'da iyo falanqaynta jinsiga, ayna xaqiijiyaan inay u adeegto oo ay ka mid noqoto falanqaynta, ka hortagga iyo ka jawaabidda colaadda;
- Xaqiijiyaan in baaritaan wax ku ool ah deg-deg ah, oo madax-bannaan, dhexdhexaad ah, dhameystiran iyo maxkamadeyn lagu sameeyo arrrimaha la xiriira eedeymaha qatarta ah ah ee loo aaneeyo AMISOM iyo ciidamada kale ee caalamiga ah, la xisaabtamaan kuwa geystay xadgudubyada, isla markaana siiyaan kaalmo iyo garnaq ku filana dhibanayaasha.
- Dejiyaan, ayna hirgeliyaan siyaasado wax ku ool ah oo lagu yareeyo khasaaraha, oo ay ka mid yihiin tilmaamo hagid oo lagu go'aamiyo bartilmaameedka.

Dhinacyada aan Dowladda ahayn sidoo waa inay:

- Joojiyaan isticmaalka dhammaan walxaha qarxa ee macmalka ah (IEDs), iyo weerarrada isku jirka ah, , ayna joojiyaan rididda dhammaan hubka qarxa oo sababa saamayn ballaaran, oo ay ku jiraan hoobiyeyaasha, gantaalada iyo bambo gacmeedyada, oo laga soo rido loona rido meelaha ay dadka rayidka ah deganyihiin;

[2] Nuqulada waxaa la siiyay mas'uuliyiinta Koonfur Galbeed, Jubbaland, Puntland, Hirshabelle, Somaliland, iyo sidoo kale, AMISOM, Wasaarada Xuqquuqda Aadanaha ee Dowlada Federaalka, iyo Safaaradaha Mareykanka Kenya ee Muqdisho.

- Joojiyaan bartilmaameedsiga ula kaca ah ee dadka rayidka ah (oo ay ku jiraan saraakiisha Dowladda, shaqaalaha rayidka, suxufiyiinta, ururrada bulshada rayidka ah, oday dhaqameedyada beelaha iyo shaqaalaha gargaarka) iyo waxyaabaha/agabka rayidka ah;

Intaas waxaa dheer, DFS iyo Dowlad Goboleedyadawaa inay:

- Ku biiraan dadaalka caalamiga ah ee sare loogu qaadayo ixtiraamka weyn iyo u hoggaansanaanta sharciga caalamiga ee xuquuqda baniaadamka xilliyada dagaallada iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha si kor loogu qaado ilaalinta dadka rayidka;
- Qaadaan tallaabooyin dhab ah oo lagu joojinayo rabshadaha ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha iyagoo si wax ku ool ah u fuliya Qorshe Hawleedka Qaran ee lagu Dhameynayo Xadgudubyada Galmada waqtiga Colaadaha oo ay ka mid tahay shirar soo noqnoqda oo uu yeesho Guddiga Qabanqaabada iyo iyagoo baaritaan ku sameynaya dacwadna ku soo oogaya kuwa lagu eedeeyo inay ka dambeeyaan xadgudubyada, oo ay ku jiraan marka ay xadgudubyada geystaan saraakiisha ciidanka iyo nabadgelyada, si waafaqsan sharciga caalamiga ah.
- Taageeraan ururinta nidaamsan iyo falanqaynta macluumaadka ku saabsan ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ka mid tahay xogta oo loo kala soocay jinsiga iyo da'da, ayna xaqiijiyaan inay u adeegto oo ka mid noqoto falanqaynta, ka hortagga iyo ka jawaab-celinta colaadda;
- Qaataan tallaabooyinka sharci dajin, siyaasadeed iyo sharci fulineed ee lagama maarmaanka u ah si loo xaqiijiyo in in baaritaan deg-deg ah, madax-bannaan, dhammeystiran oo wax ku ool ah lagu sameeyo dacwadna lagu soo oogo kuwa geysta xadgudubyada sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha xilliyada dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ku jiraan kuwa geysta dembiyada khatarta ah;
- Si dhakhso ah, madaxbannaan, wax ku ool leh, hufan oo aan eexasho lahayn baaritaan ugu sameeyaan eedeymaha xadgudubyada sharciga caalamiga ee bani'aadamnimada xilliga dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee ay geysteen ciidamada amniga iyo kooxaha hubaysan iyo, marka loo baahdo, dacwad lagu soo oogo kuwa lagu eedeeyo dembiyada;
- Sameeyaan habraacyo cadcad oo baaritaan oo lagu aqoonsanayo laguna maxkamadaynayo shakhsiyaadka mas'uulka ka ah xadgudubyada halista ah ee xuquuqda aadanaha, gaar ahaan marka la eego haweenka iyo carruurta;
- Dadka la wadaagaan natiijooyinka hay'adaha loo xilsaaray inay baaraan dhacdooyinka ayna fuliyaan talooyinkooda;
- Ansixiyaan heshiisyada caalamiga ah oo loogu talagalay ilaalinta dadka rayidka, oo ay ku jiraan heshiisyada caalamiga ah iyo heshiis gobolyada xuquuqda aadanaha, iyo Heshiiska Ka Ganacsiga Hubka iyo heshiis goboleedyada la midka ah, ayna xaqiijiyaan in sharciyada qaranka iyo siyaasaduhu ay waafaqsan yihiin waajibaadka caalamiga ah;
- Dardargeliyaan hannaanka sameynta Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha kaas oo ah inuu u shaqeeyo sidii hay'ad madax-bannaan oo waxyaabaha ay qabanayso ay ka mid yihiin, inuu baaritaan ku sameeyo xadgudubyada xuquuqda aadanaha ee dagaalka dhexdiisa lagu geysto;
- Dejiyaan siyaasad guud oo dhammeystiran oo ku saabsan bixinta cafis la siiyo dadka ka qayb qaatay colaadda, geystayna dembiyada ka dhan ah dadka rayidka, iyagoo maxkamadaynaya kuwa laga yaabo inay masuul ka yihiin xadgudubyada daran ee sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda dadka xilliyada dagaalka, oo ay ku jiraan dembiyada dagaalka iyo dembiyada ka dhanka ah aadanaha; xaqiijiyaan in cafis waliba

oo loo fidiyo xubnihii hore ee Al-Shabaab ama ciidamada amniga ee federaalka uu buuxiyo waajibaadka Dowladda ee ku aadan sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, sharciga caalamiga ah ee bini'aadanimada ee xilliga dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee qaxootiga, una hoggaansamo ballan-qaadkeedii ay ku sameysay Shirkii London oo ahaa in aysan taageerin cafis isku duuban oo loo fidiyo kuwa geysto xadgudubyada daran ee xuquuqda aadanaha;

- Xaqiijiyaan la xisaabtanka dembiyada laga galay dadka Soomaaliyeed, oo ay ka mid tahay dib-u-eegista sharciga iyo meelmarinta sharciyo cusub si loo xoojiyo ilaalinta dadka rayidka ah;
- Ka shaqeeyaan horumarinta/xoojinta dib-u-heshiisiin qaran si rabshadaha dalka looga ciribtiro;
- Dardargeliyaan dadaallada hadda jira ee lagu hirgelinayo labada Qorshe Hawleed ee sannadkii 2012kii ee ku saabsan Carruurta iyo Colaadda Hubeysan, oo ay ku jirto in dembi laga dhiyo ciidan ka qorista carruurta iyo adeegsigooda, nidaaminta kala soocidda/baaritaanka askarta iyo fulinta Amarka Taliska 1 ee Taliyaha Ciidamada XDS, ee mamnuucaya oo ciqaabaya ciidan ka qorista carruurta iyo xadgudubyada kale ee halista ah ee ka dhan ah carruurta.
- Xaqiijiyaan in dhibbanayaasha, oo ay ka mid yihiin kuwa loo geystay tacaddiyada galmada iyo rabshadaha jinsiga ku saleysan, ay helaan magdhow, oo ay ku jirto taageero caafimaad iyo mid bulsho;
- La shaqeeyaan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah si loo xoojiyo farsamooyinka ilaalinta loona xaqiijiyo u hoggaansamida sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, oo ay ku jirto hirgelinta Istaraatijiyada Hawsha Qaran ee Soomaaliya ee sannadkii 2016kii iyo Qorshe Hawleedka Ka Hortagga iyo La-Dagaallanka Xagjirnimada Rabshadaha wata, iyo hababka kale ee aan militariga ahayn oo qayb ka ah hab isku-xiran oo dhammeystiran oo amniga lagula tacaalo;
- Xaqiijiyaan in dib-u-habeynta amniga qaranka loo fuliyo si waafaqsan waajibaadka xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah, ayna sameeyaan habab kormeer ah oo ku haboon;
- Xaqiijiyaan in ololaha millatari ay la jaanqaadaan dadaallada dib-u-habeeynta amniga qaran taasoo qayb ka ah dib-u-soo-celinta iyo fidinta Awoodda Dowladda si sare loogu qaado ilaalin waxtar leh oo loo sameeyo dadka rayidka ah, ay ka hortagaan, kana joogsadaan askar ka qorista iyo afduubidda iyo xadgudubyada kale ee halista ah ee ay geysato Al-Shabaab.

AMISOM:

- Xooji iskaashiga idin kala dhaxeeya dhammaan hay'adaha Qaramada Midoobey ee ay arrintu khuseyso iyo hay'adaha kale ee bani'aadamnimada iyadoo loola danleeyahay in sare loo qaado tayada ciidamada AMISOM si ay u gutaan waajibaadkooda iyagoo si buuxda ugu hoggaansan waajibaadka Dowladaha ka qeybgalaya ee sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha ee xilliga dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha.
- Hirgeli Amarrada Taliska Ciidamada ee ilaalinta dadka rayidka ah, oo ay ku jirto Amarka ilaalinta xuquuqda carruurta iyo una hoggaansan halbeegyada habraacyada howlgalka AMISOM ee ku saabsan soo dhoweynta iyo u gudbinta carruurta horey loola xiriiriyay kooxaha hubaysan; ogeysiinta Qaramada Midoobay mar kasta oo ciidamadeedu ay carruurta ku qabtaan howlgallo si ay u sameeyan dabagal ku filan una xaqiijiyaan ilaalintooda.
- Baaritaan ku sameeyo dhammaan eedeymaha ku saabsan xadgudubyada iyo ku takrifalka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo xadgudubyada sharciga caalamiga ee xuquuqda dadka xilliyada dagaalka, warbixina ka bixi baaritaan waliba iyo natiijo kasta.

- Iskaashi la yeelo Dowladaha ciidamada iyo booliska ku deeqay (TCCs / PCCs) si loo xaqiijiyo in dhammaan saraakiisha ciidamadda iyo booliska AMISOM ay si ku filan ugu tababarsanyihiin sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo waajibaadka sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha ee xilliga dagaalka, iyo cawaaqibta ka dhalanaysa xadgudubyada ka hor inta aan dalka la keenin.
- Sii wad dadaallada dib-u-eegista hanaanka iyo hirgelinta guddiyada baaritaanka, iyada oo xoogga la saarayo hababka la xiriira xadgudubyada iyo takrifalka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha ee xilliga dagaalka; taageero ka codso Qaramada Midoobay, hadba sida ku habboon.
- In la xoojiyo Cutubka Raad-raaca, Baaritaanka iyo Jawaab ka bixinta Khasaaraha Dadka Rayidka (CCTARC) si looga dhigo uu u noqdo mid xoog leh awoodna u leh raadraaca iyo diiwaangelinta khasaaraha dadka rayidka ah isla markaana sare u qaadi tayada iyo dhaqaalaha si wax looga qabto dhacdooyinka.

Midowga Afrika:

- Sare u qaad shaqaalaha qaybta xuquuqda aadanaha ee AMISOM si waafaqsan Qaraarka Golaha Amaanka 2723 iyada oo loola danleeyahay kordhinta tayadeeda si ay u kormeerto unna xoojiso ixtiraamka sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha  ee xilliyada dagaalka iyo sharciga caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, isla markaana si deg deg ah ugu jawaabto kiisaska xadgudubyada iyo takrifalka, oo ay ku jiraan eedaymaha xadgudubyada iyo takrifalka loo geysto carruurta;
- Dhameystir dib-u-eegista iyo ansixinta siyaasadaha Midowga Afrika ee ku saabsan Anshaxa iyo Anshaxmarinta iyo Ka-hortagga Ka Faa’ideysiga iyo Takrifalka Galmada; inta sida rasmiga ah looga ansaxinayo, taageer in siyaasadahan gudaha AMISOM si ku meelgaar ah looga hirgeliyo.
- Xaqiiji in dukumiintiyada gaarka u ah hawlgalka AMISOM ay ka tarjumayaan awoodaha uu ansaxiyay Golaha Nabadda iyo Amniga iyo Golaha Amaanka ee Qaramada Midoobay, oo ay ka mid tahay marka la eego u hoggaansamidda xuquuqda aadanaha iyo sharciga bani’aadamnimada ee xilliga dagaalka. Gaar ahaan, xooji iskaashiga ee hirgelinta Siyaasadda Taxadirka Waajibka ah ee Xuquuqul Insaanka (HRDDP) iyada oo loo marayo in tallaabooyinka yareynta dhibaatooyinka lagu ballaariyo Heshiisyada Xaaladda Hawlgalka, Heshiiska Isfahamka ee u dhexeeya Guddiga Midawga Afrika iyo dalalka ciidamada keenay (TCCs / PCCs), Xeerarka Hawlgalka, Tilmaamaha Gaarka ah ee AMISOM ee ilaalinta dadka rayidka, Halbeegyada Habraaca Hawlgalinta ee la xiriira guddiyada baaritaanka AMISOM, iyo awaamirta kala duwan ee Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga iyo Taliyaha Ciidamada ama Taliyaha Booliska ee Hawlgalka.
- Tixgeli dejinta hage/tilmaame waafaqsan xuquuqda aadanaha ee Siyaasadda HRDDP ee ku saabsan taageerada iyo hawlgallada wadajirka ah ee ciidamada aan Midowga Afrika ahayn, in laga ambaqaado casharadii laga bartey tababarka ay AMISOM siiyaan CXDS.
- Xaqiiji in dhammaan dalalka TCCS / PCCs ay tababaro ku qaateen sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo waajibaadyada sharciga caalamiga ah ee bini’aadanimada ee xilliga dagaalka iyo cawaaqibta xadgudubyada uga dhalan karta dhammaan ciidamada la keeni doono Soomaaliya.

Hay'adaha/dhinacyada Bani'aadamnimada:

- Ku xisaabtan in si siman loo gaarsiiyo helitaanka gargaarka bini'aadanimo iyo adeegyadooda, taasoo u baahan in fiiro gaar ah loo yeesho shakhsiyaadka iyo kooxaha laga yaabo inay si gaar ah u nugul yihiin ama ay ku adagtahay helitaanka gargaarkaas.
- Ka hortag isku day kasta oo si ula kac ah meesha uga saara qaybo ka mid ah dadka ay dhibaatadu saameysey iyo iyada oo ku saleysan baahida iyo in laga fogaado nooc kasta oo ah takoorid toos ah ama dadban.

Beesha Caalamka:

- Inay sii wadaan dhiirigelinta iyo xoojinta taageerada Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada sidii loo hirgelin lahaa Heshiiska Amniga, iyo inay xaqiijiyaan in Qaab-dhismeedka Amniga Qaran uu ku salaysanyahay sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha  xilliyada dagaallada;
- Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowlad Goboleedyada ku taageeraan xoojinta booliska iyo hay'adaha kale ee fulinta sharciga si loo damaanadqaado ilaalinta iyo helitaanka garsoor caddaalad ah oo la awoodi karo.



**Ilaalinta Dadka Rayidka**

**Dhisidda Aasaaska Nabadda, Amniga iyo Xuquuqda Aadanaha ee Soomaaliya**